# Su’aalaha Badanaa La Isweydiiyo: Dheeraadka CPR/Gargaarka Degdegga ah

## Dheeraadka Shahaadada CPR/Gargaarka Degdegga ah

Shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha taageerada shakhsi ahaaneed, iyo kaaliyayaasha daryeelka shakhsi ahaaneed ee haysta shahaadada ama kaarka CPR/Gargaarka Degdegga ah oo xirfadahooda muujinaya waxay xaq u leeyihiin inay helaan $.25 saacaddii oo dheeraad ah marka la eego dhammaan macaamiisha ay u shaqeeyaan laga bilaabo muddada mushaharka ee koowaad wixii ka dambeeya Janaayo 1, 2024.

### Sidee ayaan u kasban karaa dheeraadka?

Kasbashada dheraadku waa fudayd!

- Haddii aad ka qaadatay tabobarka CPR/Gargaarka Degdegga ah OHCC oo shahaadada ama kaarku wali shaqaynayo, ma jiraan wax lagaaga baahan yahay oo kale. Si otomaatig ah ayaa u kasban doontaa dheeraadka CPR/Gargaarka Degdegga ah. Marka la gaaro wakhtiga cusboonaysiinta shahaadada, waxaa waajib ah inaad soo galiso shahaadada ama kaarkaaga cusub nidaamka maaraynta barashada PACE. Haddaad u baahato caawimo sida loo soo galinayo shahaadada ama kaarkaaga, waxaad kala xiriiri kartaa OHCC iimeylka training.ohcc@odhsoha.oregon.gov ama ka wici kartaa OHCC 877-867-0077.

- Haddaad haysato shahaadada la xoojiyey, wax loo dhigaa aysan jirin, ama VDQ laakiin aadan helaynin qiime sare maadaama aadan la shaqaynayn macmiil u qalma, wali waxaad heli kartaa dheeraadka CPR/Gargaarka Degdegga ah ilaa iyo inta aad haysato shahaadada ama kaarka CPR/Gargaarka Degdegga ah oo shaqaynaya oo muujinaya xirfadaha.

- Haddii aad soo galiso shahaadada ama kaarkaaga nidaamka maaraynta barashada PACE oo shahaadada ama kaarku muujiyo inaad dhammaysatay xirfadaha loo baahan yahay, ma jiraan wax


DHS 0197 (dib loo eegay 05/23)_Somali

lagaaga baahan yahay oo kale. Si otomaatig ah ayaa u kasban doontaa dheeraadka CPR/Gargaarka Degdegga ah.

- Haddii aad soo galisay shahaadada ama kaarkaaga nidaamka maaraynta barashada PACE oo aysan caddayn inaad dhammaysatay xirfadaha loo baahan yahay, OHCC ayaa kula soo xiriiri doonta. Laba ikhtiyaar ayaad lahaan doontaa:
    1. Bixi caddayn aad ku caddaynayso xirfadahaaga macallinimada CPR/Gargaarka Degdegga ah.
    2. Qaado koorso CPR/Gargaarka Degdegga ah oo kharashka ay qabto OHCC. Waxaa jirta koorso onlayn ah oo aad haddaba qaadan karto.

## Muddo intee ah ayaan ku helayaa dheeraadka?

Haddii aad haysato shahaadada ama kaarka CPR/Gargaarka Degdegga ah oo sax ah oo xirfadahaaga muujinaya, waad kasban doontaa dheeraadka ilaa inta kaarkaagu dhacayo.

## Waa maxay sababaha ay dhici karto inaanan mutaysan dheeraadka?

Ma TIHID mid u mutaystay dheeraadka ah CPR/Gargaarka Degdegga ah haddii:

- Aad haddaba hesho qiime sare maadaama aad haysato shahaadada OHCC (PDC, la xoojiyey, wax loo dhigaa aysan jirin, ama VDQ). Xasuusnaw: Waxaad mutaysan doontaa dheeraadka CPR/Gargaarka Degdegga ah ee $.25 saacaddii haddii shahaadadaada OHCC ay dhacdo laakiin aad haysato shahaadada ama kaarka CPR/Gargaarka Degdegga ah oo sax ah oo muujinaya xirfadahaaga. Haddaad haysato shahaadada la xoojiyey, wax loo dhigaa aysan jirin, ama VDQ laakiin aadan helaynin qiime sare maadaama aadan la shaqaynayn macmiil u qalma, waxaad heli kartaa dheeraadka CPR/Gargaarka Degdegga ah.


- Shahaadada ama kaarkaaga CPR/Gargaarka Degdegga ah uu dhacay.

- Aadan bixin shahaado ama kaar cusub ugu yaraan hal bil kahor inta uusan dhicin kaarkaaga haddu. Dheeraadkaagu wuxuu marlabaad bilaabmi doonaa markaad keento kaar sax ah. Ma noqon doono mid isagoo dhacay la isticmaalo, markaa fadlan la soco taariikhda dhicitaanka shahaadada ama kaarkaaga. Waxaad gali kartaa PACE si aad u eegto taariikhda.

- Aadan bixin caddaynta xirfadahaaga macallinimada CPR/Gargaarka Degdegga ah.

### Maxaa looga jeedaa shahaado ama kaar CPR/Gargaarka Degdegga ah oo "sax ah"?

Shahaado ama kaar CPR/Gargaarka Degdegga ah oo sax ah waxaa loola jeedaa inaysan dhicin waxayna muujinaysaa inaad muujisay inaad leedahay xirfad macallinimo. Kaarka ama shahaadadaadu waxaa dhici karta inay muujiso erayada sida "qiimaynta xirfadaha" ama "ujeedooyinka xirfadaha ka qaybgalka shaqada." Shahaadooyinka ama kaararka qaar waxaa dhici karta inaysan ku jirin luuqaddaasi xataa haddii aad muujisay xirfadahaaga. Arrinta noocaas ah, OHCC ayaa kula soo xiriiri si ay kaaga helaan macluumaad dheeraad ah. Halkan waxaa ku yaala tusaale kaar CPR/Gargaarka Degdegga ah oo sax ah. Waxaa ka mid ah "ujeedooyinka xirfadda" iyo taariikhda dhicitaanka ee dambe.




### Maxaan sameeyaa haddii aan rabo inaan qaato koorso CPR/Gargaarka Degdegga ah si aan u kasban karo dheeraadka?

OHCC inay arrintan kaa caawiyaan way ku faraxsan yihiin. OHCC ayaa lacagta kaa bixin doonta haddaad leedahay lambar bixiye oo shaqaynaya

iyo haddii aanan hore kaaga bixin lacagta koorsada labadii sano ee u dambeeyey. Khasab ma aha inaad qaadato koorsooyin OHCC oo kale si aad ugu qalanto. Wax lacag ah oo laguu celinayo **ma jirto** haddii aad si iskaa ah u qaadato koorso CPR/Gargaarka Degdegga ah.

Buuxi codsiga tabobarka CPR/Gargaarka Degdegga ah si aad u qaadato koorso OHCC ay ka masuul tahay.

Habka ugu fiican ee aad sidan u samayn karto waa inaad ka samaysato xisaab nidaamka maaraynta barashada PACE adigoo booqanaya websaytka: https://workspace.oregonstate.edu/ohcc
Halkan waa isla meesha aad booqato si aad isku diiwaangaliso tabobarradayada.

Waxaad ku buuxin kartaa codsiga tabobarka CPR/Gargaarka Degdegga ah onlayn: https://survey.alchemer.com/s3/6766010/Copy-CPR-FA-App

Codsiga tabobarka CPR/Gargaarka Degdegga ah sidoo kale waxaa laga heli karaa websaytka OHCC https://www.oregon.gov/odhs/providers-partners/homecare-workforce/Pages/certifications.aspx

Sidoo kale OHCC waxaad kula xiriiri kartaa iimeyl training.ohcc@odhsoha.oregon.gov ama adigoo ka wacaya OHCC 877-867-0077.

### Ka waran haddii aan u dhiibay shahaadada ama kaarkayga CPR/Gargaarka Degdegga ah xafiiska deegaanka (xafiiska APD/AAA, dallaaliinta adeegyada, CDDP, ama Comagine)?

Waxaa waajib ah inaad toos u siiso OHCC macluumaadkan. Fadlan soo gali shahaadada ama kaarkaaga nidaamka maaraynta barashada PACE oo halkan laga helo: https://workspace.oregonstate.edu/ohcc
Markaad joogto PACE, ka dooro “Upload Your CPR Card” bogga hore.

### Sidee ayaan uga samaystaa xisaabta PACE?

Si aad xisaab uga samaysato, booqo websaytka PACE oo kan ah: https://workspace.oregonstate.edu/ohcc

Raac tilmaamaha ku yaala bogga hore ee PACE. Waxaad gudbin doontaa codsigaaga xisaabta tabobarka OHCC adigoo isticmaalaya lambarkaaga bixiyaha. Waxaad ka heli doontaa iimeyl OHCC kadib hal ilaa laba maalmaha shaqada ah marka codsigaaga la ansixiyo ee xisaabtaadu shaqayso. Kadib gal si aad u soo galiso shahaadada ama kaarkaaga CPR/Gargaarka Degdegga ah iskuna diiwaangaliso tabobarrada OHCC.

## Miyey OHCC lacagta iga bixin doontaa koorso CPR/Gargaarka Degdegga ah oo onlayn ah?

Haa! OHCC waxay bixiyaan koorso CPR/Gargaarka Degdegga ah oo onlayn ah oo qiimaynta xirfadaha ee onlaynka ah ay samayso Emergency University. Markaad gudbiso dalabkaaga, OHCC waxay ku siin doontaa macluumaad dheeraad ah. Xasuusnaw, waxaa waajib ah inaad buuxiso codsiga tabobarka oo laguu oggolaado kahor inta OHCC aysan bixin kharashka koorsada. Wax lacag ah oo laguu celinayo **ma jirto** haddii aad si iskaa ah u qaadato koorso CPR/Gargaarka Degdegga ah.

## Miyey OHCC lacagta iga bixin doontaa koorso CPR/Gargaarka Degdegga ah oo fool-ka-fool ah?

Haa! OHCC waxay bixiyaan koorsooyin CPR/Gargaarka Degdegga ah oo fool-ka-fool ah. Kani waa ikhtiyaarka ugu fiican haddii aad ku nooshahay aag aan internet fiican lahayn ama u baahan tahay fasal ku baxaya luuqad aan Ingiriisi ahayn. Markaad gudbiso codsigaaga tabobarka, OHCC waxay ku siin doontaa macluumaad dheeraad ah. Xasuusnaw, waxaa waajib ah inaad buuxiso codsiga kahor inta OHCC aysan bixin kharashka koorsada. Wax lacag ah oo laguu celinayo **ma jirto** haddii aad si iskaa ah u qaadato koorso CPR/Gargaarka Degdegga ah.